[Insert School District Letterhead]

Waalidka ama mas'uulka Qaaliga ahow:

Dugsigayaga waxaad maalin kasta ka helaysaa cunto nafaqo leh. Qiimaha quraacda [$]; qiimaha qadada [$].

Carruurtaada waxaa suuragal ah in ay u qalmaan cunto bilaash ah ama cunto qiimo jaban. Qiimaha jaban ee qadada waxaa weeye [$]. "Qiimaha jaban" ee quraacda waa bilaash." Si aad u dalbatid cuntada bilaashka ah ama cuntada qiimaha jaban ee dugsiga, waxaad soo buuxisaa foomka Arjiga Gargaarka Waxbarashada adigoo raacaya tilmaamaha boggan xaggiisa dambe ku yaal. Tani waxaa ay sidoo kale ka saacidaysaa dugsigayaga in uu helaa maaliyad waxbarsho iyo kharash dhimis dheeraad ah.

Waxaad u soo celisaa foomka Arjiga Gargaarka Waxbarashda oo aad soo buuxisay:

1. Yaa heli karaa cuntada bilaashka ah ama cuntada qiimaha jaban ? Carruurta iyo qoysaska wax ka hela barnaamijka gargaarka cuntada (*Food Stamps)*, Barnaamijka Maalgelinta Qoysaska Minnesota (MFIP), ama Barnaamijka Qaybinta Cuntada ee Deegaanka Hindida (FDPIR) iyo carruurta la korinayo badankooda ayaa heli karaya cuntada bilaashka ah iyadoo aan **la soo wargelinin dakhliga qoyska**. Sidoo kale, carruurtaada ayaa heli karaysa cuntada bilaashka ah ama cuntada qiimaha jaban haddii dakhliga qoyska uu u dhaxeeyo dakhliga ku cad tirada qoyska ee shaxda ku taal bogga soo socda. Arjiga Gargaarka Waxbarashada lama oggolaanayo haddii macluumaadka la doonayo uu wax ka maqan yahay.

2. Waxaan qaataa WIC. Carruurtayda miyeey heli karayaan cuntada bilaashka ah ? Carruurta qoyska qaata WIC waxaa *suuragal* ah in ay u qalmaan cuntada bilaashka ah ama cuntada qiimaha jaban. Waxaad fadlan soo buuxisa Arjiga Gargaarka Waxbarashada.

3. Ma in aan arjiga buuxiyaa haddii aan sannad dugsiyeedkani helay waraaq sheegaysa in caruurtayda si toos ah loogu caddeeyey in ay helayaan cuntada bilaashka ah ee ku slaysan tahay Waaxada Adeegyada Bulshada Minnesota? Ha u soo buuxinin Arjiga Faa'iidooyinka Waxbarashada haddii dhamaan caruurtaada hore u heshay caddeynta cuntada bilaashka ah ee dugsiga. Haddii keliya carruurta qaar keliya ay heleen caddeynta tooska ah ee barnaamijkan waad u soo buuxin karta Arjiga Faa'iidooyinka Waxbarashada waadna u codsan karta carruurtaada kuwa aan si tooska u helin caddeynta.

4. Macluumaadka aan bixiyo miyaa la soo xaqiijinayaa? Haa, waxaa suuragal ah in aynu kaa codsanno in aad inoo soo dirtid qoraal caddeyn ah.

5. Haddii aan haatan u qalmin, xilli dambe miyaan dalban karayaa? Haa. Waxaad dalban karaysaa xilli kasta inta lagu guda jiro sanad dugsiyeedka haddii uu dakhligaaga hoos u dhaco, tirada qoyska ay kor u kacdo, ama haddii aad heshid barnaamijka gargaarka cuntada (*Food Stamps)* Barnaamijka Maalgelinta Qoysaska Minnesota (MFIP), ama Barnaamijka Qaybinta Cuntada ee Deegaanka Hindida (FDPIR).

6. Maxaa dhacaya haddii aan oggolaan go'aanka dugsiga ee arjigayga? Waa in aad la hadashid madaxda dugsiga. Sidoo kale waxaa suuragal ah in aad codsatid garqaadis.

7. Miyaan dalban karaa haddii qof qoyskayga ka tirsan uusan haysanin dhalashada Mareykan? Haa. Adiga ama carruurtaada ma aha in aad dhalashda Mareykanka qabtaan si ay carruurtaada ugu qalmaan cuntada bilaashka ah ama cuntada qiimaha jaban.

8. Waa kuwee dadka aan ku xisaabinayo xubnaha qoyskayga? Waa in aad adiga ku jirtaa iyo dhammaan dadka kale ee aqalka ku nool, qaraabo ama aan ahayn (sida awoowe/ayeeyo, qaraabo kale, ama asaxaab). Waxaad raacisaa arday reerka ka tirsan ee si ku meel gaar ah waxbarasho jaamacadeed ku maqan.

9. Maxaa dhacaya haddii dakhligaygu uusan markasta isku mid ahayn? Waxaad qortaa lacagta caadiyan ku soo gasha. Haddii aad caadi ahaan shaqeysid saacado dheeraad ah, ku soo dar, balse ha ku soo darin haddii aad marar qudha shaqeysid saacado dheeraad ah.

10. Sidee loo dhawrayaa macluumaadka aan bixiyo ? Macluumaadka aad bixinayso foomka, iyo oggolaashada canuggaaga ee faa'iidooyinka cuntada bilaashka ah ama cuntada qiimaha jaban waa macluumaad khaas ah.waana la ilaalin doonaa. .

11. Miyaan u baahanayahay in aan hawl-wadeenada dugsiga u wargeliyo haddii dakhligayaga ama tirade qoyskayga ka tirsan ee hoos isu dhinto ka dib marka aan u qalmay barnaamijka cuntada bilaasha ama qiimaha jaban ee la oggolaaday? Maya. Oggolaansha cuntada bilaasha ama qiimaha jaban wuxuu soconaya sannad dugsiyadeedka.

Haddii aad su'aalo dheeraad ah qabtid ama aad saacidaad doonaysid, waxaad wacdaa [phone number].

Daacadnimo,
[signature]

Tilmaamaha la Buuxinayo

ARJIGA GARGAARKA WAXBARASHADA

Haddii uu qoyskaaga helo barnaamijka gargaarka cuntada (FOOD STAMPS), Barnaamijka Maalgelinta Qoysaska Minnesota (MFIP), ama Barnaamijka Qaybinta Cuntada ee Deegaanka Hindida (FDPIR) waxaad raacdaa tilmaamaha soo socda :

Qaybta 1 : Sanduuqa calaamadee haddii ay tahay markii ugu horreysay ee canug loo buuxiyo arjiga cuntada dugsiga.
Qaybta 2 : Calaamadee xaashida sanduuqa ku dhegan dhammaan carruurta aqalka. Waxaad qortaa magaca canug kasta, taariikhda dhalashada, fasalka, dugsiga, iyo lambarka kiiska. Lambarka kiisaska Gargaarka Caymiska Caafimaadka *lama* doonayo.
Qaybta 3 : Ka gudub qaybtani.
Qaybta 4 : Qof qaangaar ah ee qoyska ka tirsan ayeey tahay in uu foomka saxiixo. Looma baahna lambarka Sooshal Sakuuritiga.

Haddii aad arjiga u soo gudbinaysid CANNUG AAD KORSANAYSID, waxaad raacdaa tilmaamaha soo socda :

Arji gaar ah u buuxi mid kastoo ka mid ah carruurta aad korsanaysid.
Qaybta 1 : Sanduuqa calaamee haddii ay tahay markii ugu horreysay ee canug loo buuxiyo arjiga cuntada dugsiga.
Qaybta 2 : Calaamadee xaashida sanduuqa ku dhegan « hal cunug oo aad korsatay ee aadan dhalin." Waxaad qortaa magaca canuag ad korsatid e aadan dhalin, taariikhda dhalashada, fasalka, iyo dugsiga. Qaybta ugu dambeysa "SSI ama dakhliga joogtada ah ee canugga," waxaad qortaa dakhliga loogu talagalay isticmaalka khaaska ah ee canugga ama waxaad qortaa "ma jiro" haddii canuuga uusan qabin dakhliga loogu talagalay isticmaalka khaaska ah.
Qaybta 3 : Ka gudub qaybtani.
Qaybta 4 : Qof qaangaar ah ee qoyska ka tirsan ayeey tahay in uu foomka saxiixo. Looma baahna lambarka Sooshal Sakuuritiga.

DHAMMAAN QOYSASKA KALE, oo ay ku jiraan qoysaska qaata WIC, waxaad raacdaa tilmaamaha soo socda: Waxaad soo buuxisan Arjiga Gargaarka Waxbarashda haddi dakhliga qoyskaagu uu ka yar yahay ama la mid yahay dakhliga ku yaal tirada qoyska ee shaxda. Qiimaha lacagtan waxay dhaqan galaysaa 1da bisha Juulaay, 2009 ilaa 30ka bisha Juun, 2010.

Dakhliga Guud ee Qoyska – Xadka ugu Badan

Tirada Qoyska	$ Sanadkii	$ Bishii	$ Laba Goor Bishii	$ 2-dii toddobaad	$ Toddobaadkii
1	20,036	1,670	835	771	386
2	26,955	2,247	1,124	1,037	519
3	33,874	2,823	1,412	1,303	652
4	40,793	3,400	1,700	1,569	785
5	47,712	3,976	1,988	1,836	918
6	54,631	4,553	2,277	2,102	1,051
7	61,550	5,130	2,565	2,368	1,184
8	68,469	5,706	2,853	2,634	1,317
Qof kasta oo kale ee dheeraad ah kana mid ah qoyska ku dar:	6,919	577	289	267	134

Qaybta 1 : Sanduuqa calaamadee haddii ay tahay markii ugu horreysay ee canug loo buuxiyo arjiga cuntada dugsiga.
Qaybta 2 : Ku calaamadee xaashida sanduuqa ku dhegan dhammaan carruurta aqalka ku nool aan ka ahayn carruurta la korinayo. " Waxaad qortaa canug kasta magaciisa, taariikhda dhalashada, fasalka iyo dugsiga. Haddii uu canugga helo dakhli joogta ah, sida dakhliga SSI amas mushaar ka helo shaqo, waxaad qaybta ugu dambeyso ku qortaa tirada lacagta iyo badanaaba goorta lacagta la helo. Ha ku qorin lacagaha mar-mar lagan hello shqada celinta carruurta.
Qaybta 3 : Waxaad qortaa dhammaan dakhliga soo gala xubnaha qoyska ka tirsan.
Magacyada : Waxaad qortaa magaca hore iyo magaca dambe ee dadka qaangaarka ah ee aqalka ku nool, qaraabo ama aan ahayn (sida awoowe/ayeeyo, qaraabo kale, ama asaxaab), oo aad adigu ku jirtid. Waxaad raacisaa arday reerka ka tirsan ee si ku meel gaar ah waxbarasho jaamacadeed ku maqan. Haddii loo baahdo, waraaq kale ayaad soo raacin kartaa.
Dakhli La'aan: Calaamadee saduuqan haddii qofka uusan lahayn dakhli.
Mushaharka Guud ee Bishii iyo Mushaharad : Halka ku aadan magaca qofka qaangaarka ah waxaad ku qortaa mushaharka guud shaqada ka soo gala inta aan canshuurta iyo waxyaabaha kale laga jarin, *ma aha* lacagta saafiga ah ee aqalka loo qaato. Lacag kasta horteeda, waxaad ku qortaa goorta dakhliga uu soo galo (toddobaadkii, labadii toddobaad, laba goor bishii, bishii).
Dhammaan dakhliyada kale : Waxaad qortaa dhamaan tirada lacagaha kale, oo lagu kordhiyey mushaharka iyo mushaharradda taa soo si joogta uga helo meelo kasta**.** Iskii u shaqeystaha, waxaad halkan ku qortaa daklhiga saafiga ah ka dib marka laga jaro kharashyada hawsha.
Qeybta 4 : Haddii carruurtaada loo oggolaado faa'iidooyinka cuntada, macluumaadkan waxaa lagan yaabaa in an la wadaagno barnaamijka caymiska caafimaadka Minnesota si loogu caddeeyo in carrurta ay xaq u leeyihiin barnaamijka. Sanaadiiqda waxba ha ku calaamadeyn (eber ku dhaaf) si loogu oggolaado in ay la wadaagaan macluumaadka laga leeyahay ujeeddadan.
Qaybta 5 : Qofka qaangaarka ah ee qoyska ka tirsan waa in uu foomka saxiixaa uuna bixiyaa lambarka Sooshal Sakuuritiga. Haddii qofka foomka saxiixaya uusan laheyn lambarka Sooshal Sakuuritiga, sanduuqa ayeey ku calaameyn karaan.

ARJIGA GARGAARKA WAXBARASHADA

Cuntada bilaashka ah ama jaban ee dugsiyada ● Sanad Dugsiyadeeka 2009-10 ● Barnaamijyada ay maalgeliyaan gobolka ama dawladda dhexe

1. Calaamadee halakan haddii ay tahay marka ay kugu horayso dalabka cuntada dugsiga ee ilmo kasta ee ku qoran liiska hoose ☐

2. Waxaan hoose ku qoray: ☐ **Dhamaan** caruurta qoyska ka tirsan, marka laga reebo carruurta aadan dhalin ee aad korsanaysid laga bilaabo kan marka ay dhashaan ilaa dugsi sare, (calaamadee hal sanduuq) haddii loo baahdo, ku soo lifaaq macluumaad dheeraad ah.

☐ **Hal** waxaan liiska ku qoray *caruurta aan dhalin ee aan korsado* ee ku jiraan daryeelkayga (kuwa soo oo ah mas'uuliyad sharci ah ee hay'adaha adeegyada bulshada ama maxkamadda). Codsi gooni ah ku buuxi ilmo kasta aadan dhalin ee aad korsanaysid. Isla codsi ha iskugu darin hal foom caruurta aadan dhalin ee aad korsanaysid iyo caruurta kale. Qeybta dambe ee shaxda waa in laga arkaa kharashyada ilmo kasta oo aadan dhalin oo aad korsanaysid taasi oo loogu talagalay gaarka ee ilmaha aadan dhalin ee aad korsnaysid. Haddii lacagta carruurta la korsado aan loogu talagalin isticmaalka khaaska ah Ede ilmaha, waxaad ku qortaa qeybta dame e shaxda ”midna”.

Magacyada Dhamaan caruurta qoyska marka laga reebo caruurta la korinayo ***Ama Magaca Hal Cunug La Korinayo*** Magaca Hore	Magaca Dambe	**Taariiqda dhalashada** Bisha/Maalinta/ Sanadka	**Fasalka** (PreK - 12th)	Dugsiga	**Lambarka Kiiska** Haddii aad qabtid **MFIP, Barnaamijka Gargaarka Cuntada,** Ama FDPIR oo Kaliya)	Haddi ay jirto **SSI ama Dakhliga Kale ee Canugga**
1		____/____/____				$_____ per_____
2		____/____/____				$_____ per_____
3		____/____/____				$_____ per_____
4		____/____/____				$_____ per_____
5		____/____/____				$_____ per_____

3. Waxaad qortaa *dhammaan qaangaarka* aqalka ku nool, *dakhliga dhammaantiisa*, iyo *goorta* dakhliga la helo. Haddii loo baahdo, ku soo lifaaq macluumaad dheeraad ah. Ka bood qeybta 3 ee hoose keliya haddii dhamaan caruurta loo codsanayo faa'iidooyinka cuntada ee qeybta 2 oo leh lambarka kiiska, ama haddii codsigan uu yahay kan ilmaha la korsanayo. Boga tilmaamaha wuxuu ku tusinaya dakhliga ugu sareeya ee ilamaha u osaamaxayo in ay u qalmaan barnaamijka faa’iidooyinka cuntada.

Dhamaan magacyada *dadka waaweyn* ee qoyska (Dhamaan xubnaha qoyska ka tirsan ee aan ku qornayn liiska qeybta1) Magaca Hore	Magaca Dambe	*Calaamadee qeybta haddii qofka yahay DAKHLI LA’AAN*	**Dakhliga** Ku qor dakhli kasta *iyo* goorta la helo: **weekly**, **bi-weekly** (2-dii toddobaad), **twice per month**, **monthly**, ama **yearly.** Haddii dakhliga isbebedelo, waxaad qortaa lacagta caadiyan u helo				
			Dakhliga Guud Mushaharka iyo Mushaharada ee ka gala shaqooyinka dhamaan ka hors intra an lagan jarin waxii canshuur ah.	Hawl-gab, SSI, Hawl-gabka Badbaadad Bulshada	Hantida Kaalmada Bulshada ee Taageeradda Caruurta	Shaqo la'aan, Magta Shaqaalaha ee Faa'iidooyinka Shaqo ka Fariisiga	Dakhli Kasta ee Kale, oo uu ku jiro kan *saafiga* ee Beeraleyda -Iskii u Shaqeystaha
			$____ per _____	$____ per _____	$____ per _____	$____ per _____	$____ per _____
1			$____ per _____	$____ per _____	$____ per _____	$____ per _____	$____ per _____
2			$____ per _____	$____ per _____	$____ per _____	$____ per _____	$____ per _____
3			$____ per _____	$____ per _____	$____ per _____	$____ per _____	$____ per _____

4. Haddii carruurtaada loo oggolaado faa’iidooyinka cuntada dugsiga, foomkanwaxaa laga yaabaa in lala wadaago barnaamijyada MinnesotaCare iyo aryeelka Guud ee Kaalamada Caafimaadka (General Assistance Medical Care) si loogu caddeeyo in carruurta ay xaq u leeyihiin barnaamijyada caymiska caafimaadka Minnesota. Ka eeg boga dambe waxii macluumaad dheeraad ah. Calaamadeyn sanaadiiqda si loogu oggolaado in lawadaagaan macluumaadka.

☐ Macluumaadkayga ha la wadaagin barnaamijka caymiska caafimaadka MinnesotaCare.

☐ Macluumaadkayga ha la wadaagin barnaamijka Daryeelka Guud ee Kaalmada Caafimaadka (General Assistance medical care)

5. ***Waxaan caddeynayaa in macluumaadka lagu bixiyey arjigani yahay run iyo sax. Sababta oo ah lacagta federaalka bixinteeda waxaa lagu saleynayaa warkan. Waan gartay in maamulka dugsiyadu iyo hawl-wadeenada gobolka ay caddeynayaan warbixinta ayna baari doonaan, haddii aan ula kac uga been sheego, waxay keeneysaa in sharciga laygu qaado.***

Saxiixa Dadka Waaweyn ee Guriga (waa shardi)_____ Magaca oo Daabacan_____ Taariikhda: _____

Lambarka Sooshal Sakuuritiga (waa shardi haddii qaybta 3aad la buuxiyey): _____ _____ _____ - _____ _____ - _____ _____ _____ _____ AMA ☐ Ma qabo lambarka Sooshal Sakuuritiga
Cinwaanka:_____Magaalada:_____Lambarka Xaafadda (Zip):_____Taleefoonka guriga: _____Taleefoonka shaqadaada: _____

Xasiiska oo keliya

Total Household Size: ____ Total Household Income: _____
Or Household Receives: MFIP / Food Stamps / FDPIR
Approved: Free ____ Reduced-Price ____ Temporary until _____, _____, _____
Denied: Incomplete ____ Income Too High ____ Other:
Signature of Determining Official: _____ Date:_____
Withdrawn:_____
Change Status To: _____ Reason:

Xasiiska oo keliya

Date Verification Sent: _____ Response Due: _____ 2nd Notice Sent: _____
Result: No Change ___ Free to Reduced-Price ___ Free to Paid ___ Reduced-Price to Free ___ Reduced-Price to Paid ___
Reason for Change: Income___ Household Size ___ Change in Benefits ___ Refused Cooperation ___ Other:
Date 'Notice of Change' Sent: _____
Signature of Verifying Official: _____ Date: _____

Lambarka ga / Dalabka Dhamaystir

Sharciga Barnaamijka Qadada Dugisyada Qaranka wuxuu u baahanayahay ilaa-iyo-intii laga siinayo ilmahaaga kaalmada barnaamijka MFIP, Barnaamijka Cuntada ama FDPIR ama aad u dalbaysid ilmaha aad korsanaysid oo aadan dhalin ee xubin ka ah guriga saxiixa dalabka waa in lagu qoraa lambarkooda Badbaadada Bulshada (Social Security) ama waxay tilmaamaysaa in ayagu aan lahayn lambarka Badbaadada Bulshada (Social Security). Lambarka Badbaadada Bulshada (Social Security) oo ku meel-gaar ah ma noqonayo mid joogta ah, laakiin haddii aan la siinin lambarka Badbaadada Bulshada (Social Security) ama tilmaanta saxiixa aan lahayn wax lambar ah, dalabka lama ansxinaayo.

Si u noqdo mid dhamaystiran, dalabka ku salaysan kaalmada bulshada waa in ay ku jiraan magacyda caruurta, dakhliga soo gaadhay dhamaan xubnaha dadka waa-weyn ee guriga, saxiixa xubin qof weyn ee guriga, iyo lambarka Badbaadada Bulshada (Social Security) ee xubnaha guriga ee buuxinaya dalabka.Dalabka dhamaystiran ee ilmaha la soo korsaday ee adan dhalin waa in uu ku jira magaca ilmaha, tirada dakhli kasta ku soo gala isticmaalka shakhsi ahaan ee ilmaha, iyo saxiixabqof weyn oo xubin ka guriga.

Caddeyn

Dugsiga iyo Waaxda Waxbarashada Minnesota waxay isticmaali karaan warbixinta lagu bixiyey foomkan oo ku qoran in la cadeeyo qumaatiga qiyaasta guriga iyo dakhliga iyo warbixinta kaalmada bulshada ee lagu qeexay dalabka. Dadaalka cadeymahan waxaa laga yaaba in ay sameyaan barnaamij dib u-hagaajin, xisaab-celin, iyo baaritaan waxaana ku jiraan xirrirka hay'adaha gobolka sida Waaxda Badbaadada Dhaqaalaha Minnesota ama Dakhliga si loo cadeeyo dakhliga, xirrirka Waaxda Adeegyada Dadka ama hay'adaha adeegyada dadka ee degmada si loo go'aamiyo ansaxinta waqtigan ee kaalmada bulshada, iyo baarista warqadaha soo saareyn xubnaha guriga. dadaalkan waxaa dhalin karaa in uu lumiyo ama hoos u dhigo faai'dooyinka, maamulka wuxuu ku andacoonaya ama tallaabooyinka sharciga ah haddii loo soo wargeliyo in warbixin khalad ah.

Warbixnta khaaska ah ee ka Bixineysid Dalabka Faai'dooyinka waxbarashada

Warbixinta aad ku dhiibtay foomkan waxay noqonaysaa macluumaad khaas ah. Warbixinta waxaa loo isticmaalaya si loo go'aamiyo loona xaqiijiyo in carruurta gurigaaga ay ku guulaysanayaan cuntada bilaashka ama qiimaha jaban iyo si loo maamulo iyo loo fuliyo barnaamijyada qadada iyo aquraacd. Waxaa lagan yaabaa in macluumaadkaaga an la wadaagno barnaamijyada waxbarashada, caafimaadka iyo nafaqada si loogu caawiyo in la qiimeeyo, la oggaado kharashkooda, ama oggolaanshaha ooyinka barnaamijyadooda, Dib u hubinta xisaab celinta ; iyo hawl-wadeenada fulinta sharciga si ay uga caawiyaan in lagu xadgudbo sharciyada barnaamijka. Macluumaadka aad inagu siisid dalabkan looma bixinayo ujeeddo kale haddii aan laga haysan waalidka ama mas'uulka codsi qoraal ah ay ku oggolaanayaan.

Arimaha Khaaska ah ee Xaq u lahaanshaha Cunugaaga

Qaabka xaq u-lahaanshaha ilmahaaga cuntada dugsiga (in ay ku guulaysteyn cunto "bilaash," "qiimo jaban," ama "laga dhiibay" waa macluumaad khaas ah oo loo isticmaalayo si loo bixiyo sixitaanka faai'dooyinka cuntada dugsiga ee ilmahaaga. Dugiga bulshada ee degmooyinka, qaabka xaq u lahaanshaha ilmo kasta wuxuu ku diiwaan-galsan yahay nidaamka komyuutarka gobolka oo dhan taa soo loo isticmaalayo wargekinta macluumaadka ardayga ee Waaxda Waxbarashada taa soo u baahan sharciga gobolka. Waaxda Waxbarashada waxay warbixinta u isticmaalaysaa in (1) lagu maamulo barnaamijyada gobolka iyo dawladda dhexe, (2) xisaabinta magdhawga dakhliga ee dugsiyada bulshada, iyo (3) xukunka tayada barnaamijka waxbarashada gobolka.

Sharciga dawladda dhexe wuxuu ogolaanaya in loo fasaxo xaq u-lahaanshaha ilmaha cuntada hawl-wadeenada barnaamijyada soo socda ogolaansho la'aanta qoyska: (1) barnaamijka waxbarashada dawladda dhexe, (2) barnaamijka caafimaadka ama waxbarashada oo maamulaya dugsiga ama hay'ad goboleed, iyo (3) dawladda dhexe, ama gobol, ama barnaamijka gudaha ee nafaqeynta kaa soo ka qeyb-galayaasha looga baahan yahay mid la mid Barnaamijka Dugsiyeedka Qadada Qaranka, amafaai'dooyinka barnaamijka caafimaadka (Medicaid) ama barnaamijka Kaalmada Caafimaadka (ilaa-iyo-intii aad adigu ka tanasulaysid ogolaanshaha ujeeddada dalabka). Hawl-wadeenada dugsiga waxay diri karaan warbixinta ku saabsan barnaamijyada kale ama faai'dooyinkalaga yaabo in ay xiiso u leeyihiin guriga si ay ugu guulaystaan cunto bilaash ah ama qiimo jaban. Warbixinta xaq u-lahaanshaha cuntada dugsiga waxaa kaloo loo isticmaalaya warbixinta tirakoobka (tirsiis), la'aanta aqoonsi shakhsiyadeed.

Ula wadaaga Macluumaadka ee Barnaamijyada MinnesotaCare iyo Daryeelka Guud ee Kaalmada Caafimaadka (General Assistance Mediacal Care)

Carruurta ay xaq u leeyihiin bilaashaka iyo cuntada qiimaha jaban ee dugsiga waxay xaq u leeyihiin barnaamijyada caymiska caafimaadka Minnesota. Salada ilamhaaga uu xaq u yeeshay cuntada dugsiga (una qalmay cunta bilaashaiyo cuntada qiimaha jaban) waxaa lala wadaagi karaaa MinnesotaCare iyo Daryeelka Guud ee Kaalmada Caafimaadka, haddii kale inoo sheeg in lala wadaagi karin. Adiga ma lagaaga baahna in aad la wadaagtid macluumaadka dada barnaamijkan go'aankaagana ma saameyn doono oggolaansha faa'iidooyinka cuntada dugsiga.

Qiyaasta Xuquuqda Dadka (iskaa wax -qabso ku shaqeeya)

1. Qolada uu qofku yahay (mid calaamadi):

- ☐ Hispanic ama Latino
- ☐ Aan ahyn Hispanic ama Latino

2. Dadkuu qofku yahay (calaamadi mid ama ka badan):

- ☐ American Indian ama Dadka dhaladka ah ee Alaska
- ☐Eeeshiyan
- ☐Madow ama African American
- ☐Dadka dhaldka ah ee Haway ama dadka dhaladka ah ee deggan Jasiirad kale oo Baasifik ku taal
- ☐ Caddaan

Sida waafaqsan sharciga Dawladda Dhexe iyo nidaam hawleedka Waaxda Beeraha ee Mareykanka, waxaa ay hay'adani ka mamnuuc tahay in ay dadka ku kala soocdo jinsiyadda, midabka, asalka qaranimada, lab/dheddig, da'da, ama naafada. Si aad u soo gudbisid ashtako takoor ah, waxaad qoraal u soo dirtaa USDA, Director, Office of Civil Rights, 1400 Independence Avenue, SW, Washington, D.C. 20250-9410 ama wacl (800) 795-3272 ama (202) 720-6382 (TTY). USDA waa shaqaaleeye iyo fursad bixiye dadku u siman yihiin.